## XUKUNKAAN MA CADAALAD BAA????????

Maxkamada Gobolka Banaadir ayaa waxaa ka dhacay xukun cadaalo daro ah, Taariikhdu markay ahayd 16/03/2013 uuna Garsoore ka ahaa **Dr Xaashi Cilmi Nuur**




Ilaahay Subaxaanahu watacaalaa isagoo Anibiyadiisa mid ka mid ah lahadlayo waxa uu yiri

يَٰدَاوُۥدُ إِنَّا جَعَلۡنَٰكَ خَلِيفَةٗ فِي ٱلۡأَرۡضِ فَٱحۡكُم بَيۡنَ ٱلنَّاسِ بِٱلۡحَقِّ وَلَا تَتَّبِعِ
ٱلۡهَوَىٰ فَيُضِلَّكَ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِۚ إِنَّ ٱلَّذِينَ يَضِلُّونَ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ لَهُمۡ
عَذَابٞ شَدِيدُۢ بِمَا نَسُواْ يَوۡمَ ٱلۡحِسَابِ ٢٦

Aayadani Micnaheedu waxa uu yahay

**Eebe wuxuu yiri Daa'uudow Waxaan kaaga yeelay Khaliif Dhulka ee Dadka ku kala xukun Xaqa, hana Raacin hawadaada (xun) oo uu kolkaas uu kaa Lumiyo jidka Eebe waxaa usugnaaday cadaab daran Halmaankoodii maalinka xisaabta(Qiyaamaha) darteed**.

Ayadaani waxay na tusinaysaa cadaalada in ay muhiim nolosha utahay,

Cadaaladda waa Furaha Nolosha aadanaha hadii cadaalad lawaayo waxay noqonaysaa in Dunida laga waayo Nolol sababtoo ah Cadaalo daro waxay keeni kartaa Dagaalo Abaaro.& dhibaatooyin kale oo fara badan.

Wadankeena Somaaliya waxaa soo maray xukuno kala duwan ,Magaalada Caasimadda ee Muqdisho waxaa soo maray Xaakimo ama Garsoorayaal kala duwan, Qaadiyadii soo maray Caasimada Muqdisho, waxaa ka mid ahaa Sharci yaqaankii **Cesare Maria De Vecch**, oo ahaa Xaakimkii xamar intii udhaxaysay 1923 ilaa 1928, **Cesare Maria De Vecch** waxa uu ahaa Sharci yaqaan.

waxaana uu qaadijiray Dacwooyinka udhaxeeyo Dadka Somaalida , Carabta & Talyaaniga, isagoo si cadaaladi ay ku jirto ku xukmi jiray,

Garsoorahaa Talyaaniga waxa uu xaliyay Dacwooyin Faro badan, Mid ka mid ah Dacwooyinkii uu xaliyay ee Taariikhda Somaaliya Baal Dahab ah ka gashay ayaa jirto waxayna ahayd Dacwad dhex martay Reer Somaali ah & Nin Talyaani oo Gabadhooda Dilay , Dacwadoodii waxay udhcay sidan,

Sarkaal sare oo Talyaani ah ayaa waxaa uu dilay Inan ushaqan jirtay oo Somaliyad ah Sarkaalkaa Talyaaniga ah markuu Falka Dilka ah uu fuliyay wuu isaga cararay Somaaliya, waxa uu ku laabtay Wadankiisi Talyaaniga,

Reerka Gabadha laga dilay ayaa Shir isugu yimid, shirkaasi waxa uu ka dhacay **Buulo shiidle**, Reerka ay ka dhalatay Gabadha la dilay ay uga hadlaan , waxayna isku raaceen in ay utagaan Qaadiga Talyaaniga ah , sababtoo ah waxay ogaayeen in Xaakimka Talayaniga uu yahay nin cadaalad ku shaqeeyo.

Qaadigii Talyaaniga ahaa ayay uyimaadeen Reerka Gabadha laga Dilay una usheegeen Dilkii Gabadhooda loo geestay, Garsoorihii Talyaaniga waxa uu yiri erayadaan

**1-Cadaalada waa Maalin waxba kuma qarsoomi karaan**

**2-Runtuna waa Run,Beentuna waa Been**

**3- ogaadana Xaqa lama dabooli karo**,

Garsoorihii ayaa yiri Fadlan ii ogolaada in aan baritaan soo sameeyo oo cadaalada aan ku sheegi karo.

-

Waxaa lagaaray xiligii balanta Maxkamada , Garsoorihii Talyaaniga waxa uu soo saaray xukunkaan oo ah in Ninkii Cararay in lasoo qabto lana keeno xamar si loogu fuliyo cadaalada waxay qabto.

warqad ayuu udiray Dowladii Talyaaniga si loo soo qabto Ninkii Gabadha Dilay, Soo qabashada Gacan ku dhiiglaha waxaa qayb weyn ka qaatay Nin la oranjiray **luigiAmedeo,Duke of the Abruzzi** oo markii danbe ku geeriyooday Somaaliya laguna aasay Magaalada **Jowhar.**

Nasiib wanaag Ninkii ayaa la keenay cadaala horteeda iyadoo ay Goobjoog ka ahaayeen, Reerka Gabadha dhalay, Marqaatiyaal, Ninka wax Dilay Ehelkiisa , iyo Dad kaloo fara badan.

Xukunkii sidee ayuu udhacay Maxaa lagu xukumay , bal si hoose ufiiri arinkaan,

Gabadha Somaaliyada waxaa Dilay Ninkan Talyaaniga ah, Garsooraha Maxkamada Mr **Cesare Maria De Vecch M**uxuu sameeyay bal eeg.

Garsoorahii Maxkamadii ayuu furay, Dacwadii ayuu dhageestay, markuu eegay cadeeymihii, markuu dhageestay Dhibanayaasha, markuu dhageestay eedaysanaha, markuu hubiyay dhan walbo waxaa uu riday xukunkii oo waxaa uu yiri Gabadha waxaa Dilay **Ninkaan Talyaaniga ah si Gardaro ah ayuuna ku dilay**.

waxaana ku xumay **DIL& DIYO** , waxa uuna siiraaciyay Hadii **Diyo** uu dhiibayo waxa ogolaashaheeda laga rabaa Reerka gabadha ay ka dhalatay, hadii ay ogolaadaan **Diyo** waa uu dhiibi karaa ,haduu Diyada dhiibo waxaa qasab ah in laga masaafuriyo somaaliya Xilka Dowlada uu uhayana laga qaado, Guriga uu ku leeyahay Xamarna waxaa xaq uleh in lasiiyo Ehelka gabadha laga Dilay.

Reerkii markii ay arkeen cadaalada halkaas kajirto waxay isku raaceen in ay qaataan Diyo waxaana lagu wareejiayay Diyadii iyo Gurigii loo xukumay cidii taqaano way taqanaa xamar, Guriga Gabadhii loo xukumay waxaa loo yaqaanaa Guriga **Bitnigaal** (Gabadhii Gaalada gurigeeda) waxaana uu kuyaalaa dhabarka danbe ee Wasaarada arimaha Gudaha.

Cadaalaas bal eeg Ninkaas waa Nin Gaal ah sida uu cadaalada usameeyay, Su'aal ayaa la waydiiyay Garsooraha Talyaaniga waxaana waydiiyay Reerka gabadha laga Dilay, Garsooraha Talyaaniga sababta uu sidaan u sameeyay???

waxaa uu yiri waxaan idin sheegayaa hal arin **Cadaalada waa Nolol, hadii aan sidaan sameeynin aniga manoolaan kari, anigaa ubaan in aan noolaado, Dadkana ay noolaadaan sidaas ayay cadaalad kutimaadaa**

**A**qristoow bal fiiri cadaalaas Ninka Talyaaniga ah uu sameeyay ,Xaalka xamar waa sidee hadda Macadaalad ayaa ka jirto mise Cadaalad daro.

Dhowr iyo labaatameeyo sano ayaan ku jiray dhibaato ilaah mahadiis Dowlad dhexe ayaa noo dhalatay,  waxaa lagaaray xiligii cadaalada iyo xalaasha, lakiin farxadeenii dib ayay ulaabatay  sababtoo ah waxaa meesha ka maqan waa Xukun Cadaalad leh.

Dhacdadii Naxdinta lahayd ee ka dhacday  Hoteelka Nabada (peace Hotel)  October 16,2012 ,11:00am, ayaa waxaa lagu Dilay Marxuun  **Siyaad Xuseen Sheekh**, allaha unaxariistee , waxaana si bareer  iyo ula kac udilay dhagarqabe Gacan ku dhiigle **Mahad Cabdi Adan.**





Dadka Muqdisho  degan  way kawada naxeen , lakiin qof walbo waxaa uu ku qancsanaa in cadaalada la  hor keeni doono Dhagar qabaha Dilka geestay , waxaa la horgeeyay Maxkamada Gobolka Banaadir, Garsooraha waa Ruux Somali ah  waana Dr Xaashi Cilmi Nuur

Garsoore Dr Xaashi Cilmi Nuur 16/3/2013  ayuu xukun  cadaalada ka fog  soo saaray oo ahaa in Gacan kudhiigle **Mahad Cabdi Adan uu dhiibo 120$ iyo  lixbilood oo xarig ah.**

Bal cadaalad daradaan eeg , waa Nin si bareer ah udilay Nin muslim ah,

Garsooraha Somaaliga ah,Isagoo ukala garqaadayo laba Muwaadin oo Somaali ah,oo Muslimiin ah ayuu xukun cadaalada ka fog , kuna  xadgudbay Diinteen ,Dhaqankeena & Dastuurka wadanka.

Maxkamada cid joogtay  majirto ama marqaati ama ehelka Marxuunka, Maro hoosteed ayaa lagu riday xukunka




Aqristoow qisadii hore ee Garsooraha Talyaaniga ee garta ukala qaaday Ruux Somaali ah & Nin Talyaani ah cadaaladii uusameeyay  bal farqiga udhaxeeyo kawaran

Hadii aad isbar bardhigto  Maxaad ka dhihi kartaa Garsoorkii Talyaaniga **Cesare Maria De Vecch** & kan hada Xamar yaalo ee **Garsoore Dr Xaashi Cilmi Nuur**

Waa Kaaf iyo kala dheeri waxaa meesha ku cad in aan weli lahelin Cadaalad & sinaan Ilahaayna ayadiisa waxa uu ku sheegay in hadii cadaalad iyo sinaan la waayo in nolosha oo dhan lawaayayo.

Garsoore Xaashi iyo inta ku fikirka ah waxay ka lumeen wada hagaasan  uu ALLA noo tilmaamay waxayna qaadeen wado qaldan oo inoo horseedi karto bur bur iyo dhib kale.

Ilaahay ayaa ayaadkiisa inoogu sheegay hadii aan cadaalad lasamaynin in halaag lala kulmaayo **, Dr Xaashi Cilmi & Gacan kudhiigle Mahad  Cabdi Adan** waxaa la gudboon inay weydiistaan Marxuunka Ehelkiisa   Cafis, & in Gacan kudhiiglaha umadda horteeda lagu Qisaaso taas oo ah xalka ugu sareeyo uu ku badbaadi karo AAKHIRADIISA sida uu ilaahay uu ku xusay  Quraanka Kariimka

وَلَكُمْ فِي ٱلْقِصَاصِ حَيَوٰةٌ يَٰٓأُو۟لِى ٱلْأَلْبَٰبِ لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ ١٧٩

**Waxaa Idinkuugu Sugan Qisaasta Nolol Dadka wax Garadka ahoow Waxaadna Mudantihiin in aad Dhowrsanaataan. (suratul Baqara ayada179**

Xukunkaan ka dhacay xamar ma cadaaladbaa Aqristoow jawaabtu waa MAYA

Waxaan sugaynaa Cadaalada inay dhacdo oo labadaan Ayadood laga wada faa'iido & Garsoorka Somaaliya in uusan ka liidan Kii Talyaaniga ee Gaalada. Ee aminsanaayeen sidan

**Cadaaladu waa Nolol, hadii aan sidaan sameeynin aniga manoolaan kari, anigaa ubaan in aan noolaado, Dadkana ay noolaadaan sidaas ayay cadaalad kutimaadaa**

**Cadeentii feelashii dacwada cadaala darada Garsoore Dr xaashi uu ku sameeyay marxuun Siyaad Xuseen Sheekh**, allaha unaxariistee , waxaana si bareer iyo ula kac udilay dhagarqabe Gacan ku dhiigle **Mahad Cabdi Adan.**

W/QORAY , H.A,Mohamed Adkeeste(Rusiyo)

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

MAXKAMDDA GOBOLKA BANAADIR

( QEYBTA CIQAABTA )

Lr: 350/2012-BG-

Muqdisho. Tr,30/3/2013

KU : TALIYAHA XABSIGA DHEXE EE XAMAR = MUQDISHO =

OG : XEER ILAALIYAHA GUUD EE QARANKA = MUQDISHO =

**UJEEDO : *XUKUN JIDEEYE***

Maxkamadda Gobolka Banaadir , Waxay Ku Xukuntay, Eedaysane,Mahad Cabdi Aadan Ina Nadiifo Warsame 23 Jir Ah Ku Dhashay Gaal Kacyo Dagan Xamar. Kuna Eedeysan Qod:445- X C S - Lana Xiray 6/12/2012. Kadib Markii Lagu Soo Eedeyay inuu Si Kam Ah Kudilay Marxuun La,Oranjiray.Siyaad.. Kadibna uu Qirtay. Maxkamaddu Waxay Cuskatay Qiraalka Waxayna Ku Xukuntay 6.bilod.Xarig oo Tacsiir Ah iyo 2.000.000.Sh, S o, oo Ganaax Ah Inuu Bixiyo Diyada Marxuumka. Lacagta Ganaaxa Maalintii Waa. 20 Kun Sh, So,

**KAALIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR**

C/qaadir C/llaahi Xasan

**GUDOOMIYAHA MAXAKAMADDA GOBOLKA BANAADIR**

Dr: Xaashi Cilmi Nuur

Isbitaalka Madiina
Xafiiska Agaasimaha

Tixraac:-MH/D/1/150
Taariikh:-02/12/2012

KU: Cidii ay khuseyso

Ujeeddo: - Caddeyn Dhimasho.

**Marxuum Siyaad Xuseen Sh. Xasan** Isbitaalkan waxaa la keenay 16/10/2012, isagoo dhaawac xabadeed ka soo gaarey madaxa, waxaana loo qabtay adeeg caafimaad oo degdeg ah, wuxuuna dhintay isla taariikhda aan kor ku soo sheegnay oo ah 16/10/2012, sababta dhimashada keentay waa xabada iyo dhiigbax.

Wada Shaqeyn Wacan

Agaasimaha Isbitaalka Madiina
Prof. Maxamed Yuusuf Xasan

MADINA HOSPITAL SOMALIA